

# QAABKA AAD UKALA SOOCAYSO QASHINKAADA



## QASHINKA CUNTADA

### WAXA LA SAMEEYO:

Qashinka cuntada waa in lagu rido bacaha loogu talagalay Oo lagu siiyay. Xidh bacaha oo ku rid baaldiga qashinka ee sita daboolka bunniga.



**FG:** salidda cunnada ee ku jirta dhalooyinka iyo daasadaha waa in looga tagaa -saldhigga bey'adda Mise saldhigga dib u warshaynta maadaama aay yihiin Qashin halis ah.



ASBUUC WALBA WAJIN LA URUURIYAA QASHINKA CUNTADA



Miyaad u baahantahay bac Cusub oo loogu talagalay qashinka cuntada?  
Ku xidh bacda qashinka cuntada oo faaruq ah Mid ka mid ah baaldiyadda wasaqda ee dibadda Si uu qashin aruuriyaha kuugu dhaafid mid cusub.



## BAAKADAHA CAAGA

### WAXA LA SAMEEYO:

Balastiig walba oo sita cunta, cabitaan ama alaabta reerka waa in lagu dhaqaa biyo qabow si looga bi'iyo wasaqda. Ka dhabaandhab biyaha oo ku rid bac balaastiig ah mise ku aruuri salad. Waa in afka laga xiraa ka hor inta lagu ridin baaldiga sita daboolka cawlan ee furan.



BAAKADAHA CAAGA WAXAA LA URUURIYAA SADDAX ASBUUC KASTA



Miyaad u baahantahay bac cusub? ku xidh bacda wasaqda lagu qaado oo faaruq ah mid kamid ah baaldiyada wasaqda sidaa darteed qaadaha wasaqda ayaa ku dhaafi bac cusub.



## WARQAD IYO BAAKAD

### WAXA LA SAMEEYO:

Warqadaha iyo baakadaha waa in lagu ridaa baaldiga sita daboolka baluuga/ maqsoorada dib u warshadaynta. Haddii aad leedahay warqado badan waxaad dalbani kartaa baaldi wayn oo lacag la'an ah.



WARQADAH IYO BAAKADAHA WAXAA LA URUURIYAA SADDAX ASBUUC KASTA



## QASHINKA HARAAGA

### WAXA LA SAMEEYO:

Qashinka haraaga – waxa hadhay kadib markii la sooco qashinka dib loo warshadayn karo- waa in lagu ridaa salladda kahor inta lagu ridin baaldiga qashinka ee sita daboolka midibka cawlan.



QASHINKA HARAAGA AH WAXAA LA URUURIN 3-DII ASBUUCBA MAR



Miyaad sidataa qashin haraa ah Oo badan? xaalku haduu sidaasi yahay, waxaad iibasani kartaa bacal ziyaada ah mise waxaad codsani kartaa baaldiyo waa-weyn oo lacag dheeraad ah leh. Nalaso xiriir wixii faafaahin ah.



## QASHINKA QARUURADAHA IYO QASACYADA

### WAXA LA SAMEEYO:

Qaruurad ama qasacad leh wasaq cunna, cabitaan ama wasaqda guud ee reeraha waain la lagu ridaa baaldiyada u dhaw bakhaaraha iyo xaruunta ganacsiga. Goobahaasi waxaay ku xusan yihiin kaleendharka soocosta iyo mowqacenna.



QASHINKA QARUURADAHA IYO QASACYADA WAA IN LA URUURIYA 6 ASBUUC WALBA



FG: Qaruurad ama gasacadaha waa in si toos ah loogu ridaa baaldiga qashinka; bacaha ma aha in lagu tuuro baaldigaani.

## MAXAAN U KALA SOOCAYNAA QASHINKA?

Dhamaan qashinka waa la kala soocaa; arintani Waxaay anfacaysaa dadka iyo nawaaxiga. Soocidda qashinka waxaa loola jeedaa in dib u warshadayn Lagu sameeyo sida oogu wanaagsan- si alaab cusub looga sameeyo. Mathalan, gobolka Vestfold qofwalbo waa in uu u sooco qashinka hab Waafaqsan sharciyada uruurinta qumaamooyinka ee doowladooda hoose.



vesar

AVFALLSELSEKAPET I VESTFOLD



## QASHINKA HALISTA AH

WAA IN LA GEEYAA GOOBTA BEY'ADDA MISE GOOBTA DIB U WARSHADAYNTA.

### WAXA LA SAMEEYO:

Si lacag la aan ayaad u gayn kartaa goobta dib u warshadaynta mise goobta bey'adda. Qashinka halista ah waxaa lagu ridaa baakada-hoodi assalka ahaa mise baakadayn kale oo aad calaamaysay.



## QASHINKA KORONTADA IYO ELEKTIRROONIGGA

### QASHINKA ELEKTROONIGGA

Wax walba oo u baahan in uu ku shaqeeyo elektroonik mise batari waa in looga tagaa bakhaarka iibiyo qalabkaasi mise waa in la geeyaa goobta dib u warshadaynta si lacag la aan eh.



## GOOBYADA BEY'ADDA

Waa goobyada aad kaga tagi kareyso qashinka haliska ah. Xaruntaani waxaay ku aali mel u dhaw kaalmaha shidaalka mise bakhaarada.

waxaa ku xiran quful aad ka soo qaadani kartid kaalinta shidaalka kuugu dhaw, boostaajada ama bakhaarada.

Eeg kaleendharka soocista mise [www.vesar.no](http://www.vesar.no) Si aad u ogaatid xaruunta bey'adda kuugu dhaw.



## DHARKA & DUNTA

Dharka nadiifka ah oo anagagan iyo dunta waa in lagu uruuriyaa boorsad xiran mise boorsado waasac ah. Waa in la dhigo bangiyada dunta ee u dhaw gobolkaada mise mid kamid ah goobta dib u warshadaynta. Dhar nooc walba ayaad keeni kartaa hata kuwa dillaacsan.

## XARUUNTA DIB U WARSHADAYNTA

Waa aad ka tagi kartaa alaabta waawayn ee jajaban mise qashin aan soo galaynin xeerka qashin uruuriska sida alaabta guriga, firijiyada iyo qashinka beerta.

### SAACADAHA LA FURO XARUUNTA DIB U WARSHADAYNTA:

Isniin: 10:00 – 18:00  
Talaado – Jimce: 10:00 – 17:00  
Sabtida: 09:00 – 14:00

### XARUUNTA DIB U WARSHADAYNTA EE RYGG Taranrødveien 93, 3171 Sem

### XARUUNTA DIB U WARSHADAYNTA EE LOFTERØD Møllevæien 30, 3140 Borgheim

### XARUUNTA DIB U WARSHADAYNTA EE NORDRE FOSS Hvittingfossveien 184, 3089 Holmestrand

### XARUUNTA DIB U WARSHADAYNTA EE GRINDA Lågendsveien 83, 3270 Larvik

### XARUUNTA DIB U WARSHADAYNTA EE SKOPPUM Adalsveien 22, 3185 Skoppum

### YAA ISTICMAALI KARAA XARUUNTA:

- Qashin kasta waa in uu ka yimaadaa qofka ku nool guriga.
- Ganacsatada waa in aay isla go'aamiyaan uruurinta qashinkooda.
- Iskaada u shaqayso weeyaan nidaamka xaruunta dib u warshadaynta sidaas darteed waa in aad u soocdaa qashinkaada si waa-faqsan nooca qashinka la doonaayo.
- Qashinka waxaa lagu keeni karaa gaariga rakaabka mise gaari rakaab oo sita isjiid. Miizaanka u badan gaarigiiba waa 3,500 kiilo garaam. Qashinka lagu keeni kari mayo cagaf-cagaf mise gaari xamuul ah oo wayn.
- Lacagta qashinka haraaga ah adiga ayaa bixin tusaale ahaan nooc kasta oo qashin ah oo aan lahayn nidaam dib u warshadayn.
- Carruurta da'dooda kayartahay 16 waa in aay gaariga ku sugnaadaan mar-walba oo aad booqanayso xaruunta dib u warshadaynta.



WAX SU'AAL AH?  
NALA SOO XIRIIR:

VESTFOLD AVFALL OG RESSURS AS  
Taranrødveien 95 B, 3171 Sem

Taleefan: +47 33 35 43 80  
post@vesar.no  
www.vesar.no

  
**vesar**  
AVFALLSELSKAPET I VESTFOLD